SAN DIEGO UNIFIED SCHOOL DISTRICT

PRIMETIME

EXTENDED DAY PROGRAM

The Cool School Zone

Waxaad Hada soo Dalbataa Sannad-dugsiyeedka 2009-2010

San Diego Unified School District's ee Waaxda Fursadaha Waxbarashadda Dheeraadka ah(ELO) waxay maamushaa Barnaamijka Maalinta Dheer wax La Dhiganeyo ee PrimeTime, waxayna ardeyda da'da dugsiyada hoose iyo dhexe siisaa barnaamijyada wax la dhiganeyo inta aan dugsiga la soo gelin ka hor iyo marka dugsiga laga baxo kedib. Barnaamijka PrimeTime wuxuu lacag la'aan u yahay dhammaan qoysaska, waxaana la dhigaa maalin kasta inta aan dugsiga la soo gelin ka hor iyo marka dugsiga laga baxo kedib. Waalidiinta iyo dadka ilmaha masuulka ka ah waxaa laga rabaa inay ogaadaan in waxbarashada ilmaha laga taageerayo ka sokow, ay ilmuhu qeyrkood dhex galayaan taas oo bulshanimada ku baraneyaan jawi wacan. Barnaamijka PrimeTime waxaa si wadajir ah isaga kaashada shaqaalaha ELO, ururada PrimeTime Partner, waaxaha, barnaamijyada iyo shakhsiyaadka kale ee barnaamijka PrimeTime ka shaqeeyo si uu u hirgelo. Barnaamijka PrimeTime ee heerka dugsiga hoose saamiga shaqaalaha iyo ardeydu waa 15 kii ardey iyo 1 shaqaale ah iyo kuwa dugsiga dhexe oo ah 20 kii ardey iyo 1 shaqaale ah. Maadaama miisaaniyada la hayo ay xadidan tahay iyo saamiga ardeyga iyo shaqaaluhuba, waxaa si aad ah la idin kula talineyaa inaad ardeyda xanaanada ka diiwaan gelisaan barnaamijka xanaanada ilmaha ee shatiga ama laysanka leh, halka aad ka diiwaan gelin lahaydeen barnaamijka PrimeTime.

XAQ U LAHAANSHAHA

Qoysaska leh carruurta dhigata dugsiga hoose ama fasalada Xanaanada ilaa iyo 8aad ee dugsiga ee xiiseynaysa inay ka qeyb galaan barnaamijka PrimeTime sannad-dugsiyeedka 2009-2010 waxaa loga baahan yahay inay soo gudbiyaan arjiga halkan ku lifaaqan.
Kuwan waxaa ka mid ah:

- Carruurta ka qeyb galeysa barnaamijka PrimeTime ee Maarso 2, 2009.
- Carruurta ku jirta liiska sugitaanka ee Maarso 2, 2009.

Carruurtu waa inay ka diiwaangashan yihiin dugsiga aad uu dalbanaysid inay maalmaha caadiga ah wax ka dhigtaan, si ay barnaamijka PrimeTime ee dugsiga uga qeyb galaan. Carruurta ku jirta dugsiga dhexe ee bixineya barnaamijka PrimeTime uma baahna inay arjigan soo buuxiyaan. Haddii uu ilmahaagu dhigto dugsiga dhexe, oo uu raba inyy barnaamijka ka qeyb galo waa la oggolaan doonaa. Dugsiyada dhexe taariikhaha la galayo wey kala duwanaan karaan, taas oo ku xidhan hadba sida loo heli karo saamiyada shaqaalaha ee dawlad-goboleedku u dejisan.

ARJIGA

Hal arji ayaa loo buuxin karaa dhammaan carruurta isku qoyska ah ee dugsiyada ku taxan qeybta #2 ee arjiga. Haddii aad ledahay carruur hal dugsi ka badan kala dhigata, waa in dugsi kasta hal arji loo buuxiyaa. Araajida waxaa laga heli karaa Shabakada Internetka ee waxbarashadda degmada oo ah www.sandi.net iyo dhismaha dugsiga. Araajida waxaa kale oo khadka Internetka laga heli karaa iyada oo ku qoran luuqadan dheeraadka ah ee kala ah (Isbaanish, Soomaali, Fiyetnaamiis, Tagaalo, iyo Kaamboodhiyaan).

NIDAAMKA ARJIGA

Waxyaabaha arjiga ku yaal ee 1 ilaa iyo 10 waa in far la akhriyi karo si dhammeystirran loogu soo buuxiyaa, kedibna waa in boostada U.S lagu soo diraa, laguna soo hagaajiyaa ha'ayada adeegyada carruurta dugsiga ku siineysa oo la yidhaahdo Jaalalka PrimeTime (PrimeTime Partner). Dhammaan warbixinada arjiga ku yaal waa in la caddeeyaa. Been ka sheegista ama wax ka saarista warbixinada lagaa rabo waxay keenaysaa in carruurtaada aan loo oggolaanin inay ka qeyb galaan

adeegyada barnaamijka PrimeTime ay bixiso. Arjiyada aan sida dhammeystirran u buuxsaneyn waxaa lagu soo celin doonaa waalidiinta ama dadka ilmaha masuulka ka ah ee soo direy, waxaana taariikhda boosatada lagu soo calaamadeynayaa inaysan ansax ahayn; calaamadda cusub ee taariikhda boostada ku qoran ayaa loo adeegsan doonaa nidaamka kala saarida arjiga, marka dib arjiga oo dhammeystirran loo soo gudbiyo.

Arjiga soo gudbintiisu ma kafaalo-qaadeyso inaad barnaamijka PrimeTime ka qeyb galaysid. Waxaa la rajeynayaa in dalabka la soo dalbaneyo adeegyada PrimeTime ay ka badnaan doonto inta barnaamijku uu qaadi karo inta badan dugsiyada hoose; sidaas darteed, waxaa muhim ah in arjiga si dhammeystirran intii loo soo buuxiyo, loona soo gudbiyaa wakhtigii kama-dambeysta ahaa ee loo qabtay.

WAKHTIGA BILOWGA AH EE ARJIGA

MAARSO 9-MAAJO 8, 2009
Arjiyada waa in boostada U.S lagu soo diraa, laguna soo hagaajiyaa adeegyada carruurta ee dugsiga oo la yidhaahdo PrimeTime Partner, bakhshada boostadana ay ku calaamadeysan tahay lagu soo diraamuddada u dhexeysa Maarso 9, 2009, iyo Maajo 8, 2009, si loogu daro kuwa bilowgaba la eegayo, lana marineyo nidaamka diiwaangelinta. Arjiyada lagu soo diro faakiska, e-mailka, ama kuwa gacanta laga keeno lama oggolaan doono.

ARJIYADA LA SOO DIRO KA HOR BISHA MAARSO 9, 2009
Arjiyada ay bakhshada boostadu ku calaamadeysan tahay in la soo direy ka hor Maarso 9, 2009, waxaa loo tixgelin doonaa in la soo direy Maajo 8, 2009.

ARJIYADA LA SOO DIRO KEDIB BISHA MAAJO 8, 2009
Arjiyada ay bakhshada boostadu ku calaamadeysan tahay in la soo direy kedib bisha Maajo 8, 2009, waxaa look ala tixgelin doonaa sida hadba ay u soo kala horreeyeen, iyo sida boos loo helo, sida liiska kala mudnaanta bogga sare ku xusan.

NIDAAMKA KALA-SAARIDA ARJIGA

Ha'yada waxbarashadda dheeraadka ah ee dugsi kasta adeegga ka bixiya ayaa eegi doonta dhammaan araajiga ku calaamadeysan wakhtiga ugu dambeystii loo qabtay, wakhtiga bilowga diiwaangelinta la sameynayo. Carruurta waxay diiwaangelintoodu ku salleysanaan doontaa nidaamka kala saarida iyo nidaamka kala mudnaanta ee halkan hoose ku qoran ee barnaamijkan dugsi kasta inta ardey ee uu qaadan karo. Marka ay waxbarashadda wakhtiga dheeraadka ah la bixineyo ay gaadho meesha ugu sareysa ee diiwaangelinta la sameyn karo, waxaa carruurta aan la soo oggolaanin la gelin doonaa liiska sugitaanka, sida ay mudnaanta u kala leeyihiin, waxaana la diiwaangelin doonaa marka boos loo helo.

Waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah waxay carruurtooda u dooran karaan in lagu qoro labada baranaamij ee la bixiyo inta aan dugsiga la soo gelin ka hor iyo marka dugsiga laga baxo kedib. Waxay kale oo ikhtiyaar u leeyihiin inay carruurtoodu ka qeybgalaan hal barnaamij oo keliya, kaas oo ah ama inta aan dugsiga la soo gelin ka hor ama marka dugsiga laga baxo kedib; taasina wax saameyn ah kuma lahaan doonto nidaamka kala saarida arjiga.

Arji kasta waa mudnaanta lagu siin doonaa iyada oo la adeegsaneyo nidaamka kala saarida ee halkan hoose ku qoran:

Carruurta hada barnaamijka PrimeTime ka qeybgaleysa ee Maarso 2, 2009 Ama Carruurta ku jirta liiska sugitaanka ee bisha Maarso 2, 2009, ama carruurta hada ka qeyb gasha Xarunta Kobcinta Ilmaha ee a SDUSD ee sannad-dugsiyeedka 2008-2009.	2 dhibcood Ama 1 dhibic
Waxbarashadda degmada ayaa ku talisay in carruurta waxbarashadda laga caawiyo, taas oo Kaadhadhka Warbixinada ee Heerka ku salleysan ee heerka dugsiga hoose iyo Cabbirka Qiimeynta Heerka dugsiga dhexe.	1 dhibic
Hal waalid oo keliya ayaa guriga ku nool, oo ay ku jiraan qoysaska hal waalid ama qofka ilmaha masuulka ka ah oo shaqo miletari ku maqan (nuqulka amarka ayaa loo baahan yahay).	1 dhibic
Dhammaan waalidiinta/dadka ardeyda masuulka ka ah ama waalidiinta ilmo aysan dhalin koriya ee carruurta la nool wakhti buuxa shaqeeya (40 saacadood toddobaadkiiba) ama ah ardey wakhti buuxa wax dhigta (ku diiwaangahsan ugu yaraan 12 yuunit).	1 dhibic
Wadarta Dhibcaha macquulka ah	5 dhibcood

LIISKA KALA MUDNAANTA

Araajiga diiwaangelinta ee mudnaanta koowaad la siineyo waa kuwa la siiyey 5 dhibcood, arjiga diwaangelinta ee mudnaanta ugu dambeysa la siiyey waa kuwo helay 0 dhibcood. Mararka qaarkood ee laba ama in ka badan oo araaji ah ay helaan mudnaan isku mid ah, kala saarida diiwaangelintu waxay ku xidhnaan doontaa taariikhda araajida la buuxiyey ee ku calaamadeysan bakhshada boostada.

OGEYSIINTA XAALADA ARJIGA

Waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah ee arjigan buuxisay waxaa xaalada uu arjigoodu ku sugan yahay la ogeysiin doonaa ugu dambeystii bisha Luuliyo 2, 2009. Ogeysiinta waxaa qoysaska loogu sheegi doonaa in carruurtooda barnaamijka loo oggolaadey, in liiska sugitaanka la geliyey, ama xaq u yeeshay barnaamijka PrimeTime ee dugsiga ka hor ama kedib la dhigto ee sannadka 2009-2010.

ARDEYDA LA OGGOLAADEY

Ardeyda la soo oggolaadey waxaa loo soo diri doonaa, Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyda ee PrimeTime sannad-dugsiyeedka 2009-2010. Diiwaangelintu ma ansaxmeyso ilaa Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyga ee PrimeTime 2009-2010 si wanaagsan loo soo buuxiyo. PrimeTime Partner kuma siin doonto warbixino ku saabsan Foomamka Ka Qeybgalka Ardeyga ee Sannad-dugsiyeedka 2009-2010.

NIDAAMKA IMAANSHAHA

Sida uu dhigeyo Sharciga Waxbarashadda ee Kaaliforniya, ardeyda waxaa laga rabaa inay si buuxda uga qeybgalaan barmaijka maalin kasta saacadaha la dhiganeyo oo dhan. Ardeydii si joogta ah uga qeyb geli weyda barbnaamijka waa laga saareyaa.

TALLOOYIN LOO JEEEDINEYO ARDEYDA FASALADA XANAANADA

Maadaama miisaaniyada la hayo ay xadidan tahay iyo saamiga ardeyga iyo shaqaaluhuba, waxaa si aad ah la idin kula talineyaa inaad ardeyda xanaanada ka diiwaan gelisaan barnaamijka xanaanada ilmaha ee shatiga ama laysanka leh, halka aad ka diiwaan gelin lahaydeen barnaamijka PrimeTime. Ardeyda fasalada xanaanada ku jirta ee ay walaaladood oo ka waa weyn ku jiraan barnaamijka PrimeTime ee dugsiga tixgelin ayaa la siineyaa , sidii barnaamijka loogu qori lahaa.

Wixii warbixin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka PrimeTime ee dugsiga ay carruurtaadu dhigtaan, fadlan waxaad kala xidhiidhaa ha'yada adeegyada ee la yidhaahdo Jaalalka PrimeTime (PrimeTime Partner); telefoon nambarada waxaa laga heli karaa Shabakada Internetka ee Waxbarashadda Degmada. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan maamulka barnaamijka waxaad kala xidhiidhaa ELO oo telefoon nambarkoodu yahay (858) 627-7562.